

Q&A

Ma in aan Qaataa Xoojisada Cusub ee COVID-19?



XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

Q

Waa maxay sababta xoojisooyin cusub oo COVID-19 ah ay u jiraan?

A

Feyraska Karoona wuxuu isku beddelaa noocyo cusub waqti kadib.

Xoojisooyinka cusub ee Moderna iyo Pfizer, sidoo kale loogu yeero tallaallada “mataamaha” ah, waxay ka hortagaan noocyada caabuqyada caanka ee ugu badan ee hadda jira (Omicron BA.4 iyo BA.5) iyo noocyadii asalka ahaa ee COVID-19.

XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

Q

Ciddee bey tahay in ay qaadato xoojisada cusub ee COVID-19?

A

Cid kasta oo jirta 12 ama ka weyn oo dhameysatay taxanahoodii tallaalka koobaad ee COVID-9 **IYO**

Waxaa ka soo wareegtay ugu yaraan 2 bilood markii la siiyay irbadoodii tallaalka ama xoojisada ee ugu dambaysay.

XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

Q

Waa maxay maadooyinka ku jira xoojisada cusub ee COVID-19?

A

Xoojisooyinka cusub ee Moderna iyo Pfizer waxay isticmaalaan isla maadooyinka ku jira tallaalladooda COVID-19, oy la socota isbeddel lagu sameeyay mid ka mid ah burutiinnada beegsada noocyada Omicron.

XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

Q

Waa maxay waxyeellada xoojisada cusub ee COVID-19?

A

Sida tallaallada kale, waxaad yeelan kartaa gacan xanuun, qandho, madax-xanuun, ama daal kadib tallaal qaadashada. Waxyeellooyinkaan caadiyan wey tagaan dhawr bari kadib.

XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

Q

Irbaddee xoojisada cusub ee COVID-19 baa igu habboon in aan qaato?

A

Waxaad dooran kartaa midkood irbadda xoojisada cusub ee Moderna ama Pfizer. Uma baahnid inaad qaadato isla nooca taxanahaagii koobaad ee COVID-19.

XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

Q

Waxaa dhawaan igu dhacay COVID. Markee igu habboon in aan qaato xoojisada cusub ee COVID-19?

A

Sug ilaa aad si buuxda uga bogsatid oo aadan lahayn wax calaamado ah.

Kala hadal dhaqtarkaaga caafimaadka waqtiga ugu fiican ee aad qaadan karto xoojisada cusub. Dadka qaar waxaa laga yaabaa in ay sugaan ilaa 3 bilood bogsasho kadib.

XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

Q

Xaggee ka qaadan karaa irbadda xoojisada cusub ee COVID-19?

A

Xoojisooyinka cusub ee COVID-19 waxay diyaar ku yihiin:

Auburn Outlet Collection Mall

Eastgate Public Health Center

Ama, waxaad ka ogaan kartaa dhaqtar caafimaad, rug caafimaad, ama farmashi maxali ah.

XOOJISOOYINKA CUSUB EE COVID-19

COVID-19 boosters and vaccines are always **FREE!**

No health insurance or proof of citizenship is needed.

For more information, go to:

kingcounty.gov/vaccine

